



**Link2Feed waxaa weeye softiweer macaamiisha la qaadanayo oo si amaan ah iyo sir ah u kaydiya macluumaadka. Barnaamiju waxa uu gacan ka gaystaa ogaanshaha u qalanka oo waxa uu siiyaa Kaydka Cuntada ee Rockies iyo cida ay wada shaqeeyaan macluumaad ku saabsan dadaalka samato bixinta gaajada ee bulshada.**

## Waxaanu kuu balan qaadanaynaa:

Waxaanu ilaalin doonaa sirta iyo amaanka macluumaadkaaga.

Waxa adiga iyo macluumaadkaaga ula dhaqmi doonaa si xushmad leh oo qadarin leh.

Marnaba la wadaagi mayno macluumaadkaaga shakhsii ahaaneed cid ka baxsan Kaydka Cuntada ee dalada iskaashatada Rockies.

Ma iibin doono macluumaadka nala siiyay.

Sida bangiyada oo kale, Link2Feed waxay leedahay nidaam amaan oo aad u sareeya.

Link2Feed waxay u hogaantsaa heshiiska liisanka si ay ilaaliso macluumaadkaaga shakhsii ahaaneed.

## Waa maxay sababta loo isticmaalo Link2Feed?

Macluumaadka la uruuriyay waxa uu ka caawiyaa Hunger Relief Partners iyo Kaydka Cuntada ee Rockies inay fahmaan gaajada bulshadooda haysata.

Booqashooyinka mustaqbalku waxay noqon doonaan kuwo dhakhso badan maadaama oo kaliya macluumaadka loo baahan yahay la qaado hal mar halkii booqasho kasta la qaadi lahaa.

Gelinta macluumaadka kaydka macluumaadka amaanka ah ee Link2Feed ayaa aad uga amaan badan marka waraaq lagu daabaco.

## Waa maxay sababta loo isticmaalo Link2Feed?

Kaliya shaqaalaha lagu tobobaray ayaa geli kara nidaamka.

Hunger Relief Partner iyo Kaydka Cuntada Rockies waxay samayn karaan warbixinoo cida laga sameeyay haybtooda aan la garanaynin si loo eego qaabka wax u socdaan oo macluumaad badan uga ogaano bulshada.

Warbixinaha lama raacinayo macluumaadka sheegaya haybtaada (magaca, ciwaanka, taariikhda dhalasho)

## Macluumaad nooceee ah ayaa la doonayaa?

Magaca, taariikhda dhalashada, iyo ciwaankaaga ayaa loo baahan yahay.

Su'aalo dheeraad ah sida xubnaha qoyska, qoomiyada, heerka waxbarasho, heerka dakhliga, iyo cuntada looma arko inay yihiin waajib laakiin waxay ka caawin karaan Hunger Relief Partners inay u buuxiyaan baahiyahaaga si dhaanta.

Haddii aanad doonaynin inaad bixiso macluumaadkaaga ama aanad ku qancin ka jawaabida wax su'aalo ah, waxa aad qadarin doonaa rabitaankaaga oo waxa aanu ku dadaali doonaa in aanu ku siino adeegyada waxay doonto ha noqotee.



Nagala soco @FoodBankRockies

720-473-6323 | [foodbankrockies.org](http://foodbankrockies.org)

Hay'adan waa adeeg-bixiye fursad loo siman yahay